# Iskuullaadka Frontier (Frontier Schools)
# Tusaalooyinka Buudooyinka Waxbarashada Fog (Kombiyuutarka)

- **Sharciga Buundada iyo Qallin-jebinta**

  - Laga bilaabo dhammaadka rubaca 3aad buundooyinka kor ayay u kici karaan, balse hoos u ma dhici karaan. Hase-yeeshee, ardayda waxaa weli looga baahan yahay inay dhammaystiraan dhammaan wixii laylisyo iyo qiimayn loo xilsaaray inay ku soo dhammeeyaan inta lagu jiro muddada iskuulka uu xirnaa si markaa ay u baasaan ama u helaan ama u kasbadaan dhibco buuxa ee samisterka labaad. Tan waa waxa ugu yar ee laga filanayo in ardayda oo dhan ay manfaca Hold Harmless ay u helaan.
  - Haddii ay dhacdo in ardayda ay ku guuldaraystaan inay keenaan dhibcihii ugu yaraa ee laga filanayay, maamulka iskuulka ayaa mid u qiimayn doona arday kasta ee la xiriirta haddii ay jireen wax ardayga ka xaddidayay inuu helo casharrada loo xilsaaray, farsamo xumo, iwm. Go'aanka kama dambeyska ah waxaa gaari doona maamulka iskuulka iyadoo go'aanka lagu salayn doono baaritaankooda waxa uga soo baxay.
  - Tan waxay quseysaa dhammaan koorsooyinka oo dhan marka laga reebo koorsooyinka laba dhibaclaha/MOCAP.

    Macalimiinta dhiga koorsooyinka laba dhibaclaha/MOCAP iyaga ayaa soo gudbin doona waxa ardayga ay ka filayaan ee la jaanqaadaya kulliyadda ama jaamacadda dhibcaha bixinnaysa.

- **Casharka Toddobaadlaha**

  - Macalimiinta waxay howsha ku qori doonaan maalin kasta ama toddobaad kasta midkooda. Macalimiin qaarkood waxay u gudbeen in howsha ardayga u diraan qaab toddobaadle ah qaar kalena waxay howshu ku wadaan si maalinle ah.
  - Macalimiinta iyagaa sheegi doona taarikhda la iska rabo howl/laylis kasta.
  - Ardaydu waa in la siiyaa dhowr fursaddood oo ah inuu howsha/layliska ku soo dhammaystiro. Waa in loo dibciyaa taariikhda la iska rabo in ardayga ku soo gudbiyo howsha loo diray oo ma ahan in ardayda lagu ganaaxo (buundo looga goysto) laylis uu la soo daahay. Hase-yeeshee, wakhtiga loo qabto dhammaan howlaha la soo daahay ka ma dambays waa in la soo gudbiyaa maalinta 19ka Maajo, 2020.

- **Gelista Buundooyinka**

  - Waa in la sii wadaa in buundooyinka la sii geliyo dhammaan howlaha iyo layslisyada oo dhan.
  - Ayadoon loo eegeyn buundada ardayga ee ugu yar ee samisterka, waxa la filayo ayaa ah in ardayga weli uu sii waday inuu gacan ka geysto fursaddaha waxbarasho ee loogu talagalay inta samisterka ka haray.

- **Shuruudaha Qalin-Jebinta**

  - DESE waxay ardayda 2020 ka deysay shuruudahan soo socda:
    - Imtixaanka Dastuurka Maraykanka
    - Imtixaanka Dastuurka MO
    - CPR (Dib usoo neefisida wadnaha)
  - Degmo dugsiyeedka waxay ka deysay shuruudaha Saacaddaha Adeegyada Jaaliyadda ee loogu talagalay ardayda fasalka laba iyo tobanaad ee 2020.

- **Buundada GPA/Darajada Fasalka Laba iyo Tobanaad**

  - Dhibcaha aad kasbato inta lagu jiro rubaca seddexaad oo loo geeyay wakhtiga casharaada kombiyuutarka lagu bixiyay waxaa lagu dari doonaa dhibcaha GPA.
  - Darajada fasalka laba iyo tobanaad ee ugu dambeeya ee ardayda 2020 waxaa xisaabta sal looga dhigi doonaa buundada GPA ee aad keento dhammaadka sanad dugsiyeedka.

- **Abaal-marinta Buundada Kama dambeyska Guddiga Qallin-jebinta Iskuulka**

  - Go'aannada abaal-marinta dhibcaha waxaa la qaban doonaa marka la xiro casharbixinta qatka kombiyuutarka la isu soo mariyo. Guddiga waa xisaabta ku daraa waxqabadka ardayga ee inta lagu jiray rubaca seddexaad iyo tilmaamaha waxqabadka ee inta lagu jiray wakhtiga casharada lagu bixinnayay kombiyuutarka labaduba la isku xisaabiyaa.